Alberta

War faafin

# Barta kaalmada lacagta ah waxay furmaysaa Janaayo 18

Janaayo 17, 2023 Weydiimaha saxaafadda

## Laga bilaabo Janaayo 18 saacaddu markay tahay 9 subaxnimo, waalidiinta reer Alberta ee xaqa u leh iyo dadka da'da ah waxay codsan karaan in ay helaan $600 oo ah kaalmo lacag ah muddo lix bilood ah.

Dhaqaalaha Alberta ayaa si xoog leh usoo kabsaday, laakiin dad badan ayaa wali la daalaa dhacaaya kulayliyaha guryahooda iyo quudinta qoysaskooda dowladduna waxay doonaysaa in ay arrinkaa ka caawiso. Ayada oo sidoo kale ufudinaysa kaalmooyin ballaaran oo waxtar leh si ay u caawiso dhammaan dadka ree Alberta, dowladda Alberta waxay gaarsiinaysaa gargaar loogu tala galay qoysaska, dadka da'da ah iyo kuwa aadka u nugul.

Barta codsashada onleenka ah ee ammaanka ah waxaa la daahfuri doonaa Janaayo 18 saacaddu markay tahay 9 subaxnimo. Qoysaska dakhligoodu ka hooseeyo $180,000 sannad kasta ayaa u qalma in ay bil kasta ku helaan $100 canug kasta oo ay gacanta ku hayaan kaasoo ka yar 18 sanno. Dadka da'da ah ee 65 sanno jirka ah ama kasii weyn kuwaas oo dakhligoodu ka hooseeyo $180,000 aanna qaadan Kaalmada Dadka da'da ah ee Alberta ayaa sidoo kale codsan kara lacagta billaha ah.

Qof kasta oo aan si fudud onleenka ku gali karin wuxuu si toos ah uga codsan karaa wakaalad kasta oo isdiiwaangalineed ama Alberta Support si uu kaalmo uga helo 50 goobood asaga oo ku helaya in ka badan 100 luuqadood inta lagu gudo jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah.

Codsiyada waxaa la aqbalayaa wakhti kasta inta u dhexaysa Janaayo 18 iyo Juun 30, 2023. Marka hannaanka codsigu uu soo dhammaado, inta badan dadka reer Alberta waxay lacagta heli doonaan dhammaadka bishaas. Wakhtiga saxda ah waa uu kala duwanaan doonaa.

### Codsiga onleenka ah ayaa ah mid dhakhso ah ammaanna ah

Barta codsiga ee kaalmooyinka tooska ah waxaa la diyaariyay ayada oo la tixgelinayo qarsoodida xogta iyo ammaanka qofka. Si ay u codsadaan, waalidiinta u qalma iyo dadka da'da ah waa in ay leeyihiin Akoon la Hubiyay (Verified Account) oo rasmi ah ama wali aan la ansixin, kaasoo dadka reer Alberta u oggolaanaya in ay caddeeyaan cidda ay yihiin si onleen ah ayaga oo aan isticmaalayn dukumiintiyada waraaqaha ah ama bookhashooyinka fool-ka-foolka ah.

Dadka reer Alberta waxay adeegsan doonaan macluumaadka galitaanka ee ku jira Akoonkooda la Hubiyay (Verified Accoun) si ay u galaan una buuxiyaan codsigooda onleenka ah. Codsadeyaasha waxa la weydiin doonaa su'aalo taxane ah si loo xaqiijiyo u qalmitaankooda, iyo sidoo kale macluumaadkooda bangiga si lacagta loogu shubo si toos ah akoonkooda bangiga. Codsadeyaasha aan lahayn akoon bangi waxay sidoo kale dooran karaan in ay lacagahooda ku helaan jeeg boostada loogu soo dirayo.

Kaalmooyinka fool-ka-foolka ah, kuwa onleenka ah iyo kuwa wicitaanka ah ayaa diyaar u ah dadka ku dhibban codsiga onleenka ah ama u baahan caawin dheeraad ah.

**Dadka reer Alberta ee nugul waxay si ootomaatig ah u helayaan lacagta**

Dad badan oo reer Alberta ah oo u qalma lacagaha tooska ah ee kaalmada sicir bararka ah si toos ah ayaa loo diiwaangalinayaa umana baahna in ay ka codsadaan barta onleenka ah ama si fool-ka-fool ah. Qof kasta oo hela kaalmooyin uga yimaada Assured Income for the Severely Handicapped (AISH), Income Support ama the Alberta Seniors Benefit, ama adeegyo uu ka helo barnaamijka Persons with Developmental Disabilities (PDD) horey ayaa loo diiwaangaliyay waxayna si otomaatig ah u heli doonaan lacagtooda $100 ah laga bilaabo Janaayo 31. Haddii aad hesho mid kamid ah barnaamijyadan sidoo kalena aad leedahay caruur kugu tiirsan oo ka yar 18 sanno, waxaad u baahan doontaa in aad codsato in aad hesho lacagta caruurtaada adiga oo ka codsanaya barta onleenka ah.

Daryeel bixiyeyaasha korinaya iyo kuwa qaraabada ah si otomaatig ah ayaa looga diiwaangalinayaa umana baahna in ay u codsadaan caruurta ay xanaaneeyaan.

Isaga oo la socda lacagaha jaban ee $600 ah, Affordability Action Plan wuxuu sidoo kale bixinayaa $500 oo ah guud ahaan lacag lagaaga soo celinayo korontada iyo boqolaal doolar oo ah dhimista canshuurta gaaska, iyo sidoo kale ka ilaalinta inuu kor ukoco qiimaha gaaska dabiiciga ah iyo isbadalada canshuurta dakhliga si looga caawiyo kharashka maciishadda ee sii kordhaya. Si taageero intaa dheer loo siiyo dadka reer Alberta, dowladda Alberta waxay bixisay kordhinta maalgelinaha ay maalgelinayso barnaamijyada taageerada muhiimka ah bixiya iyo kaydka cuntada oo dheeraad ah.

**Xaqiiqooyinka kooban**

- Codsiyada ayaa lasoo gudbin karaa illaa Juun 30, ayadoo lacaguhu noqonayaan kuwo horey kasoo bilowda si loogu daro bilihii hore ee qofku u qalmay kaalmada.
- Codsadeyaasha aan awoodin in ay keenaan dhammaan macluumaadka looga baahan yahay islamarkiiba waxay fursad u heli doonaan in ay codsigooda kaydsadaan ilaa inta ay codsiga uga soo laabanayaan si ay ugu daraan tafaasiisha ka dhimman. Lacagahan dib u dhac ayaa ku iman kara ilaa ay ka keenayaan macluumaadka laga rabo.
- Dowladda Alberta waxay isticmaali doontaa xogta canshuurta sannadkii 2021 ee ay ka helayso Canada Revenue Agency (CRA) si ay u xaqiijiso u qalmiddaada iyadoo ku salaynaysa dakhligaaga.
- Si looga caawiyo codsiyadooda, dadka reer Alberta waxay:
    - wici karaan khadka caawimaadda Verified Account 1-844-643-2789

    - wici karaan Khadka Macluumaadka Affordability Action Plan 1-844-644-9955.
    - bookhan karaan wakaalad kasta oo diiwaangalin ah ama xarunta Alberta Support si fool-ka-fool ah si ay kaalmo uga helaan 50 goobood iyo in ka badan 100 luuqadood si bilaash ah. Inta lagu gudo jiro muddada codsigu socdo, Alberta Supports waxay bixinaysaa saacado dheeraad ah oo ka bilaabmaya:
        - 4:30 galabnimo ilaa 8 habeenimo. Isniinta ilaa Jimcaha, iyo
        - 9 subaxnimo ilaa 3 galabnimo maalmaha Sabtida ah.
- Si lamid ah dhammaan ciwaannada oonlaynka ah, dadka Alberta waa inay adeegsadaan baasweero adag aysana cid kale u sheegin baasweerkooda. Tilmaamaha ku saabsan sida loo samaysto baaswaar adag waxaa laga heli karaa barta codsiga.
- Dowladda Alberta uma soo diri doonto farriimo qoraal ah ama iimaylo looga codsanaayo dadka reer Alberta inay usoo diraan xogtooda gaarka ah ama tan bangiga si ay u helaan lacagaha.
- Macluumaad dheeraad ah, oo uu ka mid yahay fiidiyaw sharraxaya qaabka loo adeegsanayo iyo jawaabo lagaga jawaabayo su'aalaha, ayaa onleenka laga helayaa.

**Weydiimaha saxaafadeed**

**Andrea Farmer**

780-405-0775
Xoghayaha Warbaahinta Kaalmaynta Lacageed iyo Adeegyada

**Melissa Crane**

780-777-3409
Xogahaya Warbaahinta, Teknoolojiyadda iyo Ikhtiraaca